

### **Fariinta Laanqayrta Cas (Red Cross Message)**

Fariinta Laanqayrta Cas waxaa loogu talagalay inay noqoto hab fariinta lagu gudbiyo, marka Ururka Laanqayrta Cas adeegyada boostada ka bilaabo deegaan, aan dadka isku qoyska ah si kale warqadaha loogu kala gudbin karin. Marka Fariinta Laanqayrta Cas la dirayo waxaa la isticimaalaa foom, qaabkuu yahay si wadashaqayn ah loogula heshiiyey Ururka Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas.

Fariimaha waxaa ugu horayn iyo guud ahaanba loogu talagalay in loo kala gudbiyo dadka isku qoyska ah. Hase yeeshee xeerkan waa laga leexan karaa. Fariimaha kuma qornaan karaan waxyaabo siyaasad ah, waxyaabo ciidamada ah ama waxyaabo koox lagu cunsuriyadaynayo. Maadaama ay dhici karto in waddanka warqadda loo gudbinayo dowladiisa shicibka ah ama dowladiisa ciidanka ah ay boostada Laanqayrta Cas sensur ku samayso waa muhiim inaan fariinta lagu qorin waxyaabaha kor lagu soo sheegay, markaas lama horistaagayo, in fariinta cidday ku socotey loo gudbiyo. Fariimaha Laanqayrta Cas waxaa gudbiya shaqaalaha Ururka Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas, iyo inta badan shaqaalaha u shaqeeya ururka ka jira waddanka fariimaha loo guydbinayo.

Fariinta waxaa la raacin karaa oo lagu lifaaqi karaa bog kale iyo/ ama sawir. Fariinta ma aha in baqshad xiran lagu rido, fariimaha oo dhan waa inay ahaadaan kuwo furan si falanqayntoodu u fududaato. Laanqayrta Cas laguma diri karo oo looma dhiibi karo lacag, daawo ama wax kale oo u dhigma. Mar walba oo suuragal ah Laanqayrta Cas waxay isku daydaa inay fariimihiina cidii loogu talagalay u gudbiso, laakiin waxaa dhici karta inay si lama filaan ah isu bedelaan xaaladaha ka jira meelaha dagaalladu ka jiraan.

Foomka waa loo buuxbuuxiyaa sida ugu faseexsan ee suuragalka ah iyo si taxader lehin. Wararka cinwaanka ku saabsan waa in sida faseexsan ee ugu cad ee suuragalka ah loo qoraa. Haddii meesha fariinta loo dirayaan aanay lahayn wadooyin magacyo leh, waxaad sawiri kartaa khariidad aad ku muujinayso meesha ay dadka qoyskaagu joogaan, khariidadana waxaad raacinaaysaa fariinta. Hadba siday aad ugu faahfaahsan yihiiin wararka cinwaanka ee fariinta lagu qoray, bay u badan tahay siday suuragal u tahay in fariintu gaarto cidii loogu talagalay.

Waxaannu idinka codsanaynaa inaad fariintiina jawaabta ah u soo gudbisaan Xafiiska Dhexe ee Ururka Laanqayrta Cas ee Finland, halkaas oo aanu fariintiina jawaabta ah sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah hore uga sii gudbineyno. Cinwaankayagu waa:

SPR Henkilötiedustelut, PL 168, 00141 Helsinki

wixii warar ah ee dheeraad ah dartood waxaannu codsanaynaa in lala soo xiriilo Xafiiska Dhexe ee Ururka Laanqayrta Cas ee Finland. tel. 020 701 2000 / Aki Väilä.